

Diyaarinta Nadiifinta Caloosha:

Tubada Laalaabanta Ee Lagu Eego Dhinaca Bidix Ee Mindhicerada

Magnesium Citrate ee Nadiifinta Caloosha

Waa muhim in aad raacdo **dhamaan** tilmaamaha lagu siiyo ee u diyaargarowga baaritaanka. Waa in jirkaagu nadiif ahaadaa sidoo kale si dhakhtarku u arki karo xilliga baaritaanka. Dadka qaar baa u arka in baaritaanka qeybta ugu adag ay tahay diyaarinta caloosha.

Isu Diyaarinta Baaritaanka

Waxa aad isticmaaleysaa **Magnesium Citrate** ee nadiifinta Caloosha si aad jirkaaga u nadiifiso. Fadlan raac dhamaan tilmaamaha. Si aad ugu diyaargarowdo baaritaanka, fadlan farmashiyaha ka iibso waxyaabaha caloosha lagu nadiifiyo.

Haddii aad horey kelyaha uga jiratay ama qabto cudurada kelyaha, ha isticmaalin **Magnesium Citrate** ee nadiifinta caloosha oo la xiriir dhakhtarka kuu qoray tubada Laalaabanta Ee Lagu Eego Dhinaca Bidix Ee Mindhicerada.

Daawada aad iibsaneysa:

- Dhalo 10 wiqiyadood ah oo Magnesium Citrate ah.
- 2 baako oo cusbada (Fleets enemas)

(Uma baahnid in dhakhtar kuu qoro)

Waxaa ku soo wacaya kalkaaliye caafimaad oo qaabilsan diiwaangelinta 5 ilaa 7 cisho ka hor baaritaanka. Waxa ay ku weydiinayaan su'aalo kaa caawinaya u diyaargarowga baaritaanka, waxa ay kaala hadlayaan caafimaadkaaga; waxxayna kaa caawinayaan daawada aad qaadato ka hor iyo ka dib baaritaanka. Haddii aad qabto **wax** su'aal ah oo ku saabsan tilmaamaha, fadlan soo wac **(320) 229-4974** Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxeysa 8da aroornimo ilaa 4ta galabnimo. Waxa kale oo aad soo wici kartaa 1-844-795-1734. Haddii aad rabto inaad bedesho balanta, fadlan soo wac **(320) 229-4933**.

Shan (5) cisho ka hor inta aan lagu galin tubada

- **Ha qaadan** qaadan daawoyinka shubanka joojiya sida: Imodium ama Pepto-Bismol.
- **Ha qaadan** daawoyinka saraxada jiliciya – Sida: Metamucil ama Citrucel.
- **Ha qaadan** fatiimanada birta dhiiga xoojiya – Sida: Multi-vitamins.
- **Ha qaadan** fatimiin E ama daawada:

Sadex (3) cisho ka hor inta aan lagu galin tubada

- **Wax yar oo cuntada caloosha jilicisa ku bilow - Ha qaadan** cuntada aad caloosha u jilciya tusaale ahaan: Daangada, miraha (gabaldayaha, lawska iyo salbukada), rootida sareenka ka sameysan, miraha la qariido, ansalaatada, qudaarta ceyriin, ama markaa la soo jaray ama qalalan. Xadid inta aad hilibka ka cunto.

Laba (2) cisho ka hor inta aan lagu galin tubada

- Biyo badan cab (sideed galaas oo biyo ayaa lagula talinayaa).

Hal (1) maalin ka hor inta aan lagu galin tubada

- Bilow cabitaanka **Biyaha cad ee daawada lagu daray Ha** cunin **wax** cunto adag ah maalinta ka horeysa baaritaanka.
- **6da** Maqribnimo waa inaad cabtay dhamaan dhalada **Magnesium Citrate**
- Waa inaad ka fogaan suuliga marka aad bilowdo inaad cabto **Magnesium Citrate**. Waxaa kugu dhacaya shuban waxaadna dooneysaa inaad markiiba musqusha gaarto.
- Waxa aad cabi kartaa **biyo** kaliya ilaa **saqda dhexe**.

Maalin ka hor inta aan lagu galin tubada

- Waxa aad qaadan kartaa daawada **adiga oo biyo yar ku kabanaya**.
- Waxa aad cabi kartaa **biyo** kaliya ilaa **afar saacadood ka hor** balanta aad ku **tageyso**.
- Xusuusnoow **ha cunin cunto adag**.
- **Hal Saac** ka hor inta aadan guriga ka bixin qaado **kan ugu horeeya** ee biyaha cusabada leh Fleets enema.
- **30 daqiiqo ka hor** inta aadan guriga ka bixin qaado **kan labaad** ee biyaha cusabada leh Fleets enema.
- Waxaa laga yaabaa in dhakhtarku ku weydiisto inaad horey u timaado si aad uqaadato cusbada Fleets enemas.